# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:11 AM** **Hansard No.19/8** **Kal-fadhi 19aad fadhiigsa 25aad**

21/10/2012

**Dooda Wax kabadalka iyo kaabista Xeerka Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka Qaranka oo socotay 1 maalin waxaana ka qayb qaatey 04 mudane.**

***Gudoomiyaha: -*** Fadhigu wuu inoo furan yahay, sidaad la socoteen waxaa la idiin qeybiyay Wax kabadalka iyo kaabista Xeerka Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka Qaranka**,** markaa mudanayaasha dooda ka qeyb-qaadanayaa ha isu qoraan, Xoghaytuna waraaqaha ha u qeybiyaan.

1. **Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde:-** shirgudoonka, xildhibaanada iyo martida kaleba waad salaaman tihiin, Xeerkan nuxurkiisu wuxuu ka soo dhexbaxay siyaasada Qaranka ee (national health), markaa laba arrimood baan wax ka odhanayaa, midi waa weeye warbixin yar oo guud inkastoo xeerka ama warbixintii wasiirka ee shalay aanu inoogu darin, sturctureka caafimaadku wuxuu ka soo dhex baxayaa community xaga hoose, grass rootka ka bilaabmeysaa, loogu tala galay ilaa 200 oo qoys daboolo baahiyahooda, MCH ayaa ku xiga, Cusbataalada ku xiga, TB centerska ku xiga iyo Mental clinics, hadaynu soo qaadno warbixintii (health post) 2009-10 waa koley wuxun baan intaa kordhaya waa **160**, MCHs waa **87**, Cusbitaaladu waa 7, TB waa **10**, Mental clinics waa **3**, dhakhaatiirta dadka ka hawlgalaa waa **86**, neerasyaduna waa **369** , mid wits waa **89,** farsamayaqaanka kale cidluu yaalaa, ------ waa **4** dalka oo dhan, laps waa **24**, medical schools wasaarada ka diiwaangashan waa **2 markaa ahaayeen**, neeras mid wifs schools waa 5,

   Markaa**,** waxaad arkeysaa inay kooban tahay dadka boardka soo gali karaa oo matalayaa, waayo hadaynu boarka soo qaadano 11 xubnood buu ka kooban yahayh, waxaa caafimaad ku jira oo matalayaa waa 6, inta kale meelo kaley ka socdaan sida Wasaarada Arrimaha Gudahaa, ladagaalanka musuqa ama waxbarashaada ama Hay'ada xuquuqal insaanka, marka 11kii 5 ka mida yihiin ay ka socdaan technocrats oo intuba fulinta ka socdaan oo aanay ahayn dadkii caafimaadka ehellka u ahaa, waxaa meesha ka maqan cidii dad weynaha ka wiila, ilayn service bay qabanayaan oo u qabanayaan dadweynaha.

Tan labaad waxa weeye qaabka loo soo xulayo, Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka madaxweynaha soo magacaabaya, halkaa waxaa ka imanaysa powerkii gudidda inta kale iyo labadii oo Madaxwenuhu soo magacaabay, labadii oo madaxweynuhu soo magacaabay wasiirka lama shaqeynka karaan, amar ka qaadan maayaan, Wasiirka waxaa soo magacaabey Madaxweynaha Caafimaadka cida ugu sareysa oo aynu ku ognahayna waa Wasiirka Caafimaadka,  halkaa waxaa ka imanaya wada shaqeyntii kumaba aqaano, waayo isku power iyo degreeto, oo labadii madaxweynaha soo magacaabay, Markaa halkaa in dib loogu noqdo oo labadaa laga soo dejiyo oo la yidhaahdo Gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxaa soo magacaabaya Wasiirka Caafimaadka**,** inta kale waxaa soo dooranaya ururada ay ku jiraan ee ururka dhakhaatiirta, ururka kalkaaliyayaasha, ururka sheybaadhada iyo ururka farmasiyada iyo ururka mid wifs iyo  kulyayada caafimaadka iyo umulisooyinka.

**Waxaan qabaa anigu** in **5** xubnood tiradooda la dhimo, dad ka muusuula oo ka wakiila dadweynaha anigu sida loo soo xulayo garan mayo, laakiinse meesha wey ka maqanyihiin, waxaa kaloo meesha ka maqan xeerkani waa regulatory, wuxuuna regulategareynayaa tayadii iyo aqoontii dadka xirfada  ku shuqulka leh iyo tayadii daawooyinka iyo adeega, waxaynu ognahay dadkeenu waxaya adeegsadaan 60% dawo dhaqameed oo u taga dadka dhirta wax ku daweeye ama wadaada ah, waxaa kaloo ka sii daran, mental hospitals ka dalka ka furan maanta inta dawlada u qoran ee ka diiwaangashan waa labdaa aan idiin sheegay oo kaliya ama saddex, meel aanay ka furneyn oo kumanaan ku xeraysnayn ma jirto, regulationka meelay ka soo galaan iyo cid la xisaabtameysaana xeerka kuma taalo, dee waan in lagu xusaa sida layeelayo oo ha lagu cadeeyo.

**(Traditional medicine)ku** ethics kale iyo qaabkooda waa la habeeya aduunkoo dhan oo dawladaha waaweyn baa ogol qaarkook, cidii habeyn lahayd kuma taalo xeerka, waa negligence, ninku ku tagimaayo oo xeerku wuxuu leeyahay shahaadaa laga doonaya, dee ku tagimaayo barito ,  ma mamnuucin ma cadeyn oo qodobka ayaa qabanaya lama odhan, too total silence oo waa vacuum waana laga wada faa’iideysanayaa hadaanan xeerka lagu cadeyn waxa qabanaya.

**Point of correction, Md. Kijandhe: -** wuxuu leeyahay xeerku qofkaan shahaado haysan qof xanuunsanaya ma daweyn karo ayuu leeyahay xeerku, traditional kuwa ka mida gudidda qaabilsan buu leeyahay xeerku sida wax loogu sameynayo.

**Md. C/qaadir Jirde: -** Qodobkee bay ku taala? Hadaynu sooq aadano cusbitaaladeena oo dhan sariiraha yaalaa **1750** bay ahayd warbixintii **2009-10**, cusbitaalada waalida ee magalaada hargeysa dadka ku jiraana waa 2000 ama 3000 inay yaalaan baa laga yaabaa, markaa miisaanka intaa le'eg bay leedahay lama ignore garenyn karo, ta kale, national policyga waxaa ku yaala council kaa la abuurayaa waxa miisaaniyada uu leeyahay ma jiro, dibada ayay ka helaan.

markaa Xeerku **Qodobka 23aad** wuxuu jideynayaa miisaaniyadna inay yeeshaan, lacag fundraising ah loogu yabooho iyo lacagaha ruqsad siinta, marka anigu ma qabo in lacagaha ruqsad siinta gudiddu qabato, wixii dakhli ee dawlada soo gala waxaa la ogyahay inay taha inay dawlada soo gasho, hadii la doonayo wa loo sameeyo warenkula soo noqda marka la qabto, oo waaranka ha loogu soo dedejiyo, hadii hay'ada lacag qabatey iyadu ha isticmaasho la oo yidhaahdo dariiq bay furaysaa. Markaa miisaaniyadana in loogu daro, fundraising loo sameeyo, intaas ayaan ku soo gabagabynayaa.

**2. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac:-** shirgudoonka iyo mudanayashu way salaamantihiin, marka hore, maalin walba waa la doodaa oo minutes ama hadal qoraal baa la qaadaa, hadal qoraakaasi waa biyo col dhaanshey, 20 xildhibaan baa fikir isku raaca, fikirkaa waxba kama badalo ujeedada xeerarka, waxaan codsan lahaa inaan fikirka lagu soo daro oo aan nalaka dhigin dhagaxaan iska fadh-fadhida, ujeedada xeerkan ina horyaala waa in la sameeyo Gudi la mida Gudiyada caalamiga ah ee Caafimaadka lagu magacaabo General Medicine council GMC, waxaan dhaliilayaa Gudidda arrimaha Bulshada oo wax warbixina aan soo raacin xeerkan oo sidiisii bay inoogu soo gudbiyeen.

Magaca la siiyay xeerka ee wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Golaha mihnadlayaasha caafimaadka ayaa loo bixiyay, markaa ha loo badalo , ***Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka Qaranka***, Gole qaran sida dastuurku qorayo waxaa ah Golaha Wakiilada, Golaha Guurtida iyo Golaha Wasiiada Golekale qaran ma noqon karaan, kalmada Mihnadana iyadu afsomali maaha, markaa in la yidhaahdaa Xirfadlayaasha Caafimaadka, GMC caalamka wuxuu ka shaqeeyaa, hubinta shahaadooyinka xirfadlayaasha caafimaadka ama dhakhaatiirta, dabagalka iyo kormeerka xilgudashada dhakhaatiirta iyo xirfadlayaasha Caafimaadka, eegida iyo wax ka qabashada cabashooyinka dadweynaha.

Markaa ujeedadu haday tahay, in la aasaaso gudi qaran oo dabagal ku sameeyo dadka ku shaqeeya caafimaadka iyo dhakhaatiirta, dadweynaha caafimaadka isticmaala nina waa service provider nina waa service users, markaa qofka isticmaalayaa waa inuu wakiil yeeshaa, waxaa kaloo jirta Gudidda Guud ee xirfadlayasah (GMC) wuxuu wax ka qabtaa, marka xadgudub ka yimaado caafimaadka, umuliso ama kalkaaliso key noqotoba makra dhibaato hagooda kaga timaado qof, qofka (Compensation) ama ciwad baa la siiyaa, ciwadkii la siinayay qofkii meesha uu dacwoonayo xeerka laguma sheegin, cid ka wakiil ahina Gudidda uguma jirto. waxaa haboon markaa in xeerka lagu soo daro meelay u gudbiyaan cid dhibaato ka soo gaadho ama u communicate gareeyaan waa inay helaan.

Waxaa la yidhi, Gudiddu waxay ka kooban tahay ***11 xubnood*** marka laga reebo Gudoomiyaha iyo Ku-xigeenka, waa 13 xubnood, waxaa ku jira laba dhakhtar oo kaliya, mid ka imanaya wasaarada iyo mid ka imanaya ururka dhakhaatiirta, markaa waxaan ku raacsanahay xildhibaankii iga horeeyay in ***"dad ehel u ah caafimaadka inay gudidda u bataan***" xataa meelo kale ha ku jireene, waxaa kaloo ku jira balance of power iyo check and balance waxaynu odhan jirney, marwalba xeerarka halkan aynu ka gudbino, Gudoomiyaha, Gud, Ku-xigeenka iyo Chief executiveku waxay ka imanayaan 3 waaxood ee dawlada waax ka mid oo concentrated ku yihiin.

Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in Gudoomiyaha iyo Gud, Ku-xigeenka mar walba la leeyahay madaxweynahaa soo magacaabaya, "***waa inay Gudiddu iska dhex doortaad fadhiga ugu horeeya Gudoomiyaha iyo Ku-xigeenka***", Gudoomiyaha madaxweyne soo magacaabey oo degreeto ku keenay, power buu leeyahay wasiirbaan la hadli kariin, sidoo kale waxaan leeyahay kala badh xubnaha Gudiddu waa inay noqdaan dhakhaatiir, mararka qaar waxaa la odhan karaa, dhakhaatiirtu isma regulategareyn karaan, anigu waxaan qabaa dhakhtar damiir leh haduu arko xadgudub dhakhtarka saxiibkii uma gacala miisayee wuu ka qabanayaa khaladka.

Qodobka ka hadlaya Gudiddu halkey ka imanayaan waa **Qodobka 6aad** anigu xubinta ka imanaysa Wasaarada Arrimaha Gudaha waxay meesha ka qabanayso garan mayo, waxaan leeyahay Golayaasha Qaranka ee sharci dejintu gudiyadey ansixiyaan dabagal bay ku leeyihiin, dadweynahana iyagaa ka wakiila, Markaa waxaan odhan lahaa, xubinta Wasaarada Arrimaha Gudaha waa in Golaha Wakiilada ka yimaadaan oo lag ubadalaa, halka xubinta Gudidda Musuqmaasuqa mudane ka tirsan Golaha Guurtida lagu badalo gudidda musuqmaasuqa iyada hawlkaleynu u diranaye,

waxaan kaloo raacsanahay in Xubin Culimada ka mida lagu soo daro, oo waxan oo kuliyada xubnaha ka imanaya ha loo badalo xubin ka imanaysa Culimada diinta oo marjac u noqoto.

***Waxaan hadalkeyga ku soo koobayaa:-***

- In Gudiddu inaany noqon Gudi lacag qabata oo waan ku raacsanaha xildhibaankii iga horeeyay.

- In Golaha wakiilada iyo Guurtida sida Gudidda doorashooyinka qaranka, in gudi walba oo ay ansixiyaan xubin ku darsadaan ka wakiila.

3. **Cali Xasan Maxamed:-** marka hore gudoomiyaha xildhibaanada dhamaan waad salaamantihiin, bacda salaam marka hore xeerkan wax ka badalka iyo kaabista xeerka golaha mihnad layaasha caafimaadka oo la inoogu soo gudbiyay oo la inoogu soo gudbiyay wax ka badal ahaaan, waxay ahayd in gudidda la soo mariyo oo ay war bixin ka keenaan oo ay doodu ka danbayso sida procedure ku ahaan jiray. Dee imika haduu golaha horyaalo oo doodu socoto waxii sax niina mooyaane wax role ah kuma lahan xeerbaana laga doodayaa dee xeerkana awooda ugu wayn golahaa leh waxaana xildhibaan walbana sida ay wax ula muuqdaan. Markaa dhawr qodob ayaan wax ka taataabanayaa.

Xeerkanu sida ku qoran magaca iyo aasaaska sida **Qodobka 3aad** xeerkan waxaa lagu aasaasay golaha mihnadlayaasha caafimaadka Somaliland kaas oo leh shaqsiyad qaanuuniya oo madax banana lehna shaabad u gaara, markaana muhiim maahan shaabadaasi taasi. Takale markaan akhriyay xeerkan waxaan kala saari waayay in gudidu madexbanaan tahay iyo in ay cid hoos imanayo oo markaan xeerka akhriayay maan arag qodob si cad u sheegaya oo qeexaya in ay gudidu madax banan tahay sidii gudiyadii hore oo hoos imanaysa sida waxsaarada caafimaadka .

Markaa aniga soo jeedin taydu waxa ay tahay in ay hoos imanaysi gudidda caafimaadka, waayo xeerka gabigiisuba madaxbanaani ka hadli mayo, hadii aynu qorno madexbanaani waa in xeerka gabi ahaanba lagu sameeyaa (complete transformation) kamana maar mayo in gudidan oo kale ay wasaarada wad shaqayn toodu ay toos ahaato markaa qodobkaasi waa qodobka iigu horeeyo, markaa hadii aan u dhaafo.

**Qodobka 6aad** oo ay aad mudanayaashii hore uga hadleen wax badana aan isu fikrad kanahay qodobkaasi waxa uu ka hadlayaa golaha Qaran ee

mihnadlayaasha waxaanu ka kooban yahay Gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxaa soo maga caabaya Madaxweynaha mudada xilka Gudoomiyaha iyo ku xigeenku waa sadex sano oo ka bilaabanta maalinta Gudoo miyaha Maxkamada sare soo dhaariyo, waxaan gudoo miyaha iyo ku xigeenkiisa la magacaabi karaa hal mar waxaana la socda 13 xubnood markaa tiradaasi waxaan is idhi way badan tahay marka gudidda la sheegayo markaa badnaanta is ka dhaafo anuu waxaan qabaa in sadexda xubnood ee xaga hoose ku jira aan ka saaro

Xubin ka imanaysa wasaarada arimaha gudaha waxaan qabaa in laga sooro xildhibaan kii horana wuu sheegay waanan ku raacsanahay, waayo gudidani waxay u baahan tahay marka ay go'aano gaadho cidii go'aanadeedaaa fulin lahayd wasaarad kastaana marka aya doonayso in go'aanadeda la fuliyo waxay wax u soo qortaa wasaarada wasiir kastaana marka uu booliska iyo in hawl loo filiyo doonayo waxa uu soo maraa wasaarada maadaama, markaa maadaama oo uu go'aan koodu uu soo marayo ama wasaarada caafimaadka ha soo mariyaan ama toos ha u soo gudbiyaane hadii markasta wasaarada arimaha gudaja la soo marayo hadii cid talaabo laga qaadayo sida uu xeerku dhigayo marka hore in ay ku sii jirto looma baahna taasi waa mid

Ta labaad ee aad leeyahay halaga saaro waa xubin ka imanaysa Ururada shaybaadhka iyo xubin ka imanaysa Ururada farmasiiyadda labadaana in laga saaro ayaan qabaa sobobtuna waxaa weeyaan nature gudidani waxaa weeyaan waxay hubinaysaa sida uu xeekani sheegayo ama awooda uu siiyay waxay hubinaysaa shaybaadhada, farma siiyada, daawooyinka, dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha dhamaan in ay ku haboon yihiin shaqada ay qabanayaan markaa waa conflict of interest markaa hadaad tidhaa gudii wax baadhaysay way ku jirayaan oo farma siiyaduna waa meesha ugu dan ee ay dhibaatadu ka jiraan ee u baahan in la hubiyo saxada meesha, dawadooda ,agabkooduba, shaqaalahooda, markaa hadii layidhaa iyana waa ay ku jirayaan waa dhib waana wax isu soo noqnoqonaya waxanan qabaa in laga saaro waxaanan qabaa in lagu badalo laba xubnood oo ay golayaashu ay soo magacaabaan oo aanay noqon xildhibaano sidii uu xildhibaan kii iga horeeyay sheegay oo aqoona u leh xubinta sadexaad waxaan kaga dari lahaa Gudidda Quality Control ka, gudiyo badan ayaa ku jira waxaa ka mid ah gudidda xaquuqal insaanka Qaranka, gudida ladagaalanka musuqmaasuqa, markaa gudidda quality control kuna waa aria ay iska soo galaan  waayo dawooyinka iyo wax yaalahaa ayay controleysaa waxanan qabaa in sadexdaa laga dhigo.

Waxaan u gudbayaa **Qodobka 8aad oo** sheegay xilka iyo waajibaadka golaha, markaa waxaa halkan ku jira wax yaabo aan shaqadooda ahayn, **Farqada 7aad** ee **Qodobkaa 8aad** waxaa ku qoran awoodahooda waxaa ka mid ah ansixinta xeerarka caafimaadka oo taasi waa shaqo baarlamaan ee maahan shaqadooda markaa haday u jeedaan xeer hoosadada iyo xeer nidaamiyaasha waxaa ka hadlaya Qodobka danbe ee awoodaha golaha qodobka 11aad kaas aya ka hadlayaa qodob kaasi waxaa uu ku joogaa 10 farqadood waxaan ku dari lahaa **farqal 11aad** "***hubinta goobaha dawada lagu kaydiyaa in ay ku haboon yihiin sida farmasiiyada iyo meelaha istoodhyada ah"*** sobobtuna waxaa weeyaan dawooyinka waxaa korka kaga qoran temperature ka ay u baahan tahay in lagu kaydiyo oo qaar ayaad arkaysaa in ay ku qorantahay 5 lama dhaafin karo waxaanad arkaysaa in aku jiraan meelo aad u kulul oo ay ka mid yihiin sandaqado aan u kulul oo tempreture ay ku jiraan ay gaadhayso 37 ay marayaan oo aad u kulul markaa waa shaqadooda in ay hubiyaan meelahaa oo kale waayo dhakhaatiirta oo leh wax ay kuu tarayaan ma jiraan hadii intaa ay dhaafaan.

Awoodaha golaha dhawr qodob ayaan mulaaxaday lahaa sida ***Qodobka 9aad farqada 2aad*** goluhu waxaa uu waood u leeyahay in uu galo goobkasta oo caafimaad markaa awooda la siinayaa waa in aanay noqon mid mudlaqa oo waa sax in uu gala lakiin marka hore waa in uu sitaa

- ✓ Waa in uu sitaa cadeymihiisa uu ku galayo meesha
- ✓ Waa in ay gudi ahaan ka soo saaraan go'aan in halkaa lagalo

Isla qodonkaa 9aad waxaa ku qoran farqadiisa 5aad go'aaminta lacagaha ruqsad siinta iyo ansixintooda 'qodobkaasi waxaa uu ka soo horjeeda qodobka 54 aad ee dastuurka go'aaminta iyo ruqsad siinta midna awood uma lahan ee waxaan qabaa in qodonkaa sidiisa meesha looga saaro waayo waxay yidhaah deen lagacta waxaa laga qaadayaa 100,000 wayna ansixiyeen xeer dajina maahan ee waa in meesha laga saaraa.

**F/7aad** ee ka sii hoosaysa waxaa uu yidhi waa in la laalaa kuliyad caafimaan oo goluhu uu go'aamiyaa markay arkaan in ay ka hoosayso heerkii caafiamaad markaa halkaasi ma final baa waayo waa in uu helaa kuliyada ama meshaasi meel ay ku dacwooto sida maxkamad waayo dood ayuu ka qabi karaa oo uu inta aan maxkamadda loo gudbin loo gudbiyaa wasiirka oo kale oo la yidhaa oo qofka laftiisu xaquuq helaa markaa

xeerkanu waa muhiim ee wixii toos toosina ama soo jeedina in lagu daro waad mahad san tihiin.

**4, Dr. Cali Yuusuf Axmed:-** horta xeerkan inyar baan ku darayaa, xeerkan xukuumadaa soo gudbisey, procedurekana kolkii Gudi hoosaadka loo gudbiyay, Gudidd hoosaadkuna wuxuu leeyihiin inay wax ka badalaan, inay wax ku soo daraan, iyagu waxay soo jeediyeen in sidaas ay ku soo gudbiyaan wasiirkiina way keeneen, Liiskii Gudiddu soo saxiixdeyna way soo gudbiyeen, khasab maaha inay Gudiddu xeerka wax ka soo badasho,

Anigu qodob yar yar baan soo jeedinayaa, Magaca Golaha loo bixiyay, waxaan odhan lahaa in medical board ama Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka laga dhigo, waayo sidii C/raxman Xoog sheegay waxaa jira 3 Gole, Gole afraad oo jira dasteerkana kuma qorna, waxaa la soo jeediyay Xubnaha Gudidda ee faraha badan, anigu saddex hay'adood baan ka saari lahaa, labana waa ku dari lahaa.

***Waxaan ka saarayaa 3 hay'adood ee kala ah.***

- ✓ *Wasaarada Arrimaha Gudadaha*
- ✓ *La-dagaalanaka Musuqmaasuqa*
- ✓ *Gudidda Qaranka ee Xuquuqan insaanka*

Waxaan ku badalayaa labada hay'adood ee kala ah.

- ✓ ***Xeer-ilaalinta***, waayo qofbaa qaliin khalada lagu sameynayaa ama qof aan aqoon u lahayn baa adeegii caafimaadka siiyay, taasi danbi bey noqoneysaa, halkaa waxaa soo galaya Xeer=ilaalinta.
- ✓ ***Vintnery board,*** halkan aynu ka ansixinay, cuduro badan oo dadka iyo xoolaha **wadaagaan** baa jira, oo wax badan bay wadaagaan, kolkaa waxbey halkaa ka tarayaan.

**Qodobka 8aad** xilka iyo waajibaadka Gudidda, Faqrad cusub baan ku dari oo noqoneysa 10 faqradood buu ahaaye**, F/11aad** oo noqoneysa siduu wasiirku soo jeediyay shaley dadka aqoonyahanada caafimaadku khalad bay gali karaan oo dhimashaa iman karta, hadhaw waa balaadhaa dhakhtarku inuu khalad sameeyay ama mihnadiisii si khalada u adeegsaday, xeer ilaalintuna way soo galaysaa, " inay talaabo ka qaadaan dhakhtarka khalad sameeya ama mihnadiisa si khaldan uga faa'ideysta".

**Qodobka 10aad F/1aad** waxay leedahay Gudidda Heer qaran fadhigiisa Caadiga ah yeelanaya labadii biloodba hal mar, wey badan tahay hal

mar shaqadiisuna wey badan tahay, marka inay bishiiba laba jeer kulmaan ayaan ka dhigaya. **Qeybta 4aad**, **Qodobka 21aad** waxaa ku taala ***Gudidda Anshaxa***, markaa hadaan Golihii Gudi u bixiney, Markaa Halkaa Gudidda Anshaha waxaan u balayaa **"Gudi-hoosaadka Anshaxa",** intaas ayaa ku darayaa, waad mahadsantihiin.

**Gudoomiyaha:-** Doodii wey dhamaatey, bari minuteska ayaa la isku soo hagaajinayaa saadanbena Xeerkaynu u codeynayanaa, Fadhiguna wuuu Xidhanyahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
------------------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
-----------------------------------------------------